RIYO KA WAYN

QiSADii MAXAMMAD



QISADII MAXAMMAD

Iyadoo looga reebay waxyaabaha qaar si ay ugu habboonaato jillidda, haddana markii la soo baadhay ee la xaqiijiyay qisadan dhabta ah waxaa loo soo bandhigay sidii ay u dhacday.

www.morethandreams.org
somalia@morethandreams.org
© 2014 All Rights Reserved


Sida uu qabo dhaqanka dadka aan ka dhashay ee Fulanigu, aniga oo reerka ugu yaru, waa inaan aroortii ugu hor tooso, si aan u guto waajibaadkayga maalinta.

Waa inaan soo guro xaabo si aan lo'da ugu shido dab ka celiya dhuugga dhibka ku haya. Dabadeedna, waa inaan waalidkay u tago oo soo salaamo.





Haddana waa inaan lo'da liso. Oo aan waylaha ku siidaayo hooyooyinkood oo aan lo'da foofiyo. Wiil kasta waa ku waajib inuu lo'da foofiyo. Wiil kasta oo Fulani ah oo aan lo'da foofin waxaa loo arkayaa mid wax ma tare ah.







Tan iyo caruurnimadaydii, aad baan u jeclaa aabbahay. Oo wax kasta oo uu samaynayo, waxaan jeclaa inaan la sameeyo. Xattaa markuu tukanayo, waan la tukan jiray. Waxaan qalbiga aad uga doonayay inaan ka farxiyo aabbahay iyo Ilaahayba, doonistaas oo igu sii korodhay markaan sii waynaaday.











Saddex sannadood waxaan joogay Bauchi anoo Qur'aanka ku baranayay guriga Sheekha. Kaligay ma ahayn, waxaanse meeshaas wax kula baran jiray dad badan oo kale. Waxaan baranay duruusta aasaaska Islaamka iyo Adaabta.




Intaas ka dib, waxaan aaday Gombe oon laba sano ka sii watay barashada Islaamka iyo tafsiirka Qur'aanka.




Haddana waxaan laba sano joogay Maiduguri anigoo sii waday barashada Qur'aanka. Markaan tagay Zaria, waan aqaanay akhriska iyo qoraalka afka Carabiga. Waxaan Zaria joogay hal sano si aan u sii kordhiyo aqoontayda Islaamka.

Markaa waxaan ahaa laba iyo labaatan jir. Waxaana billaabay inaan raadiyo sidaan ku tagi lahaa Sacuudi Carabiya oo aan waxbarasho sare ugu soo qaadan lahaa. Markaa waxaan aabbahay ka helay fariin inaan guriga ku soo laabto.







Waxaan noqday wadaadka iyo macallinka tuuladanada.

Maalin, markaan xoolaha soo xareeyay ee tukannay salaaddii cishaha, waxaan u fadhiisannay inaan cashayno.

Maxaan ka yeellaa xaasaskaaga? Sideennu odhan annagu?

Aabbe, waad ogtahay inaanan wali guursan.

Xaqiiqa, laakiin miyaanay idamka Allah ahayn in ninku guursado?

Xaqiiqa, way tahay.

Haddaba, miyaad diidan tahay middaa?

Maya, Aabbe. Waxaanse rabaa diinta Allah inaan si fiican u barto. Sidaasuu qalbigaygu rabaa.


Waa hagaag, kugu eedayn maayo damaca naftaada, laakiin Sacuudigu wuu fog yahay, hooyadaana waxay ka baqaysaa inaad soo noqon waydo.

Bal aynu aroortii si fiican uga sheekaysanno, soo ma aha?











Riyadaa ka dib hurdadii waan ku noqon waayay. Sariirtaan ku fadhiyay illaa waagu ka baryo. Waxaan damcay inaan aabbahay u sheego riyada, haddana waan ka noqday. Subaxdii, meella ma aanan aadine waxaan joogay guriga si aan u nasto.





Salaadda cishaha ka dib, waxaan u fadhiisannay cashadii oo ku kor sheekaysannay sidii caadad noo ahayd. Markii dambe, qof walba wuu hurdo tagay.


Durbadiiba markaan gam'ay, riyo labaad baan arkay.










Wiilkayga, maxaad halkan ka qabanaysaa?
Garan maayo.

Ma ku geeyaa guriga?


Wiilkayga, waan ku jeclahay.


Markaan arkay riyada labaad, ma aanan cabsan.


Oo aad uma aanan dhididin sidii riyadii koowaad. Waxaan is waydiiyay kan uu yahay ninkan aan ku riyoodayu. Sababta uu ii badbaadinayo ee uu iigu sheegayo…

…waxyaabahaas? Waxaana go'aansaday inaan aabbahay u sheego riyada. Isna durba wuu go'aan qaatay.

Is diyaari. Waxaan u kacaynaa faaliyaha.








Aabbe, wiilkaagu wuxuu u gacan-galay qumayooyin! Waxay ku dili lahaayeen laba maalmood!




Waa wax wanaagsan inaad ii keentay. Anigaa wax ka qaban.



Waxan ma aragtaa? Ku xoq madaxiisa inta uusan seexan habeenkii.




Midkanna shiid oo sidii fooxii ku shid qolkiisa inta uusan seexan. Way baabi'in riyada oo mar dambe ma uu arki doono.



Riyadu mar dambe soo noqon mayso?

Mar dambe soo noqon mayso! Waligeed!






Aabbe, aabbe!

Waa maxay?

Riyo kalaan arkay.

Riyo maxay ah?



Waxaan ku dhacayay god markay shayaadiintu ii yimaadeen! Midkood wuxuu lahaa miciyo iyo cidiyo dhaadheer.



Oo wuxuu igu yidhi godka ku bood haddii kale waxaa ku dili libaax. Anigoo raba inaan godka ku boodo, waxaan arkay ninka dharka caddaa.

Ninka dharka cad?




Haa, midkii riyada kalena i caawiyay.

Muxuu kuu sameeyay?

Wuxuu i waydiiyay inaan guriga u socdo. Waxaan idhi, “Haa.” Haddana wuxuu i waydiiyay inaan u baahanahay caawimo. Haddana waxaan idhi, haa.



Markaasuu lugtiisa ku dul fidiyay godkii oo godkiina wuu daboolmay, oo wuxuu i geeyay gurigii. Markuu guriga i geeyay, wuxuu ii sheegay inuu i jecel yahay oo wuuna tagay.




Ruuxyadii shayaadiinta ahaana?

Markay isaga arkeen, way qarsoomeen!

Hadda iska seexo. Riyadii way dhammaatay.

Haddii riyadu soo noqoto, aroortii waxaan aadaynaa Sokoto waxaana u tagaynaa faaliye kale, haye? Hadda tag oo seexo.






Habeenkii xigay waxaan arkay riyo kale. Kadibna waxaan si xidhiidh ah u riyooday lix habeen oo isku xiga. Riyooyinkaas, ninkii xidhnaa khamiiska cad ee nuuraya ayaa joogay oo iga badbaadiyay ruuxyadii shayaadiinta.


Dhammaadka riyo kasta, wuu ila hadlayay isagoo leh:
“Waan ku jeclahay wiilkayga. Waan ku jeclahay wiilkayga. Waan ku jeclahay.”

Markaas waxaan gartay ninkan aan ku riyoodaa inuu yahay ninka la yidhaahdo Nabi Ciise; midka ay Masiixiyiintu ugu yeedhaan “Ciise Masiix.” Dabadeedna, waxaan arkay riyadii ugu dambaysay oo ahayd tii toddobaad.








Maxaad akhrinaysaa, wiilkayga?
Ma fahmayo.
Ma rabtaa inaan ku caawiyo?
Haa, waan rabaa.
Maxammad, kitaabkanu wuxuu ka yimid Ilaah, waxaana ku qoran Eraygiisa. Aayadahan oo dhamu waa erayga Ilaah. Weligaa miyaad maqashay jidka, runta, iyo nolosha?
Weligay ma maqal.

Waxaan ahay jidka, waxaan ahay runta, waxaan ahay nolosha. Qofna uma tago Aabbaha xaggayguu uga yimaaddo mooyee.

Adigu kumaad tahay?

Waxaad ii taqaan Nabi Ciise.

Haddaad aqbasho inaan ahay Rabbiga iyo Badbaadiyahaaga, waxaad noqon caruurta Ilaah.

Ma caruur buu leeyahay Ilaahay?

Caruurta Ilaahay waxay ka dhashaan Ruuxiisa, ee kama dhashaan jidhka. Ilaahay ma rumaysan tahay?

Haa, waan rumaysnahay Ilaah.

Anigana i rumee. Adduunkan, waxaad la kulmi doontaa imtixaan badan, laakiin riyaaq. Adduunka waan ka guulaystay. Miyaad rabtaa inaad i aqbasho?

Haa, waan ku aqbalayaa.

Subaxdaas, waxaan go'aansaday inaan booqdo nin Masiixi ah oo ku noolaa tuulo noo dhaw. Waxaa la odhan jiray Jonatan. Waxaan rabay inaan dantayda u sheegto waayo wuxuu ahaa nin wanaagsan. Jonatan wuu dhagaystay waxa kasta oon u sheegay. Kadibna wuxuu aaday nin wacdiye ah oo joogay Bauchi.




Qays, sidaan kuu sheegay, waxaan dooni Maxammad. Halkan aan ku kulanno.




Dabadeedna

Qays, waa nabad.


Soo noqod wanaagsan, Jonatan.



Maxammad, soo dhawoow.



Waxaa riyooyinkaaga iiga sheekeeyay saaxiibkaa Jonatan. Waxaan jeclaan lahaa inaad adiga qudhaadu iiga sheekayso.




Waxaan wacdiyaha u sheegay waxii aan Jonatan u sheegay oo dhan… Islamarkiiba, wuxuu igu gubaabiyay inaanan lumin wakhti kale, laakiin aan aqbalo in Ciise yahay Rabbigayga iyo Badbaadiyahayga…



Wuxuu igu hoggaamiyay tukasho fudud, waxaana Ilaah waydiistay dembidhaaf. Waxaana aqbalay in Ciise Masiix yahay Rabbigayga iyo Badbaadiyahayga.



Markaan indhaha kala furay, waxaan dareemay farxad iyo nabad aanan waligay dareemin. Dhammaan cabsidii iyo walbahaarkii way ka baxeen qalbigayga! Isla markiiba waxaan dareemay Ruuxa Ilaah oo igu gubaabinaya inaan gurigii aado oo waalidkay u sheego waxaan helay.




Hadda, malaha waan riyoonayaa! Wiilkayga oo Masiixi ah? Wah? Wiilkaygii Muslimka ahaa miyaa gaal noqday! Ma dhab baa! Taas aqbali maayo.



Toddobaad kadib, waxaa ii yeedhay aabbahay si uu ii waydiiyo waxa igu dhacay. Wuxuu ogaaday inaan akhristo Kitaabka Qudduuska, iyo in aanan aadin masaajidka.




Waa inaad laba mid doorato— inaad Ciise ka hadho iyo inaad gurigan ka tagto oo dib ugu soo noqon!





Waxaan ahaan Masiixi, illaa uu Ciise yimaaddo si uu ii tuso halkaan aadayo.



Aabbahay markuu arkay inaan ku adkaystay jidkayga, wuxuu qaraabadaydii oo idil ku booriyay inay ii arkaan cadaawe ina colaadiyaan. Waxaan joognay dhawr bilood. Waxay igu khasbeen inaan sun cabbo. Aabbahay iyo qaraabadaydii waxay isku raaceen marka aan dhinto in ay maydkayga ku tuuraan wabiga. Dhammaantood waxay sugayeen inaan dhinto, laakiin waxaan galay gudaha oo waan seexday. Waxbana ma aanan noqon. Durbadiiba wuxuu warbixin u diray beeshii Muslimka isagoo ku gubaabinaya inay soo qabtaan Masiixiyiinta aniga i baddalay. Xeer-ilaaliyihii guud wuxuu igu riday xukun ah in aniga la isoo qabto oo la i dilo xabbadna la igu dhufto.








Dhulkaan ku dhacay anigoo xanuunka fallaadha igu dhacday la galgalanaya. Aad buu u xoog badnaa xanuunku, waxaana ku dhawaaday inaan u dhinto.




Ilaahay wuxuu adeegehiisa iiga soo diray tuulada Jonatan. Wuxuuna i geeyay waddada wayn dhinaceeda. Isla markuu waddada i geeyayba, waxaa noo yimid nin baabuur wata, oo i geeyay isbitaal.




Aabbahay markuu ogaaday meesha aan joogo, wuxuu u sheegay arintayda maxkamadda shareecada Islaamka. Waxaa la i xidhay muddo lix bilood ah.



Dabadeedna waa la isii daayay, iyadoo la igu daray askar booliis ah oo guriga i geeya.



Waxaana lo'da raacayay muddo toddoba bilood ah.



Aabbahay wuxuu isugu yeedhay qaraabadii oo ku dhiirigaliyay in si fiican la ii dhaqaaleeyo, si aan u illoobo Masiixinimada. Wuxuuna igu dhiirigaliyay inaan iska illoobo wixii hore.


Qaraabadaydu waxay u maleeyeen in wax walba caadi ku soo noqdeen oo wax dhib ah aanan qabin. Laakiin wuxuu qalbigaygu dareemayay in rumaysadkaygii uu sii yaraanayo.

Waxaan xaqiiqsaday aabbahay iyo qaraabadaydu in ay isku dayayeen inay iga fogeeyaan Ilaahayga oo anna aanan si adag u muujin rumaysadkayga.



Subax wanaagsan, aabbe.


Subax wanaagsan. Halkaa fadhiiso.



Waxaan rabaa inaan ka hadallo gabadha kuu doonan. Wax kasta waan diyaariyay.




Aabbe, waxaan rabaa inaan kaaga mahadnaqo waxyaabahaad ii samaysay oo dhan. Laakiin… waxaan rabaa wax ka wayn guur iyo aroos.




Muxuu yahay waxa aad u baahan tahay, wiilkayga?


Aabbe waa wax Ciise kaliyu samayn karo.



Muxuu Ciise ku siin karaa oo aanan anigu ku siin karin? Ii sheeg hal wax.



Aabbe, miyaad i siin kartaa nolosha waligeed ah?



?!

Maya… kuma siin karo.

Aabbe, haddaadan i siin karin nolosha waligeed ah, kama tegi karo Ciise.

?!


?!

Markaan ka tagay gurigii aabbahay, waxaan aaday Jos. Waxaana ku noolaa muddo laba sano ah. Mudadaas, wax xidhiidh ah lama yeelan reerka.

Waxaana reerka ka helay fariin— aabbahay oo bukooday oo galay isbitaal oo rabay inuu i arko.


Wiilkayga, i cafi. Waan kugu gafay, oo adiguna hal eray ma aadan odhan.

Aabbe, waa horaan ku cafiyay. Kitaabka Qudduuskaa na baraya inaan is cafino.




Wiilkayga, aad ugu adkoow Ilaahaaga aad rumaysan tahay.


Aabbe adiga xataa wuu noqon karaa Ilaahaaga.



Isagu waa Ilaaha jacaylka. Hal wax uun baa la rabaa.



Imisaa la iska rabaa?



Waxba aabbe. Waa deeq lagu helo Ciise Masiix. Aqbal isaga oo wuxuu noqon Badbaadiyahaaga. Wuxuuna ku sii doonaa nolosha waligeed ah. Miyaad aqbalaysaa?

Waan jeclaan lahaa inaan helo deeqdaas.





Markaan tukannay, saddex saacadood kadib aabbahay wuu dhintay. Wuxuu dhintay isagoo nabad iyo farxadu ka buuxaan. Wuuna ogaa meesha uu tagayo. Wuxuu u tagay Ciise. Heshiiskanagu wuxuu xalliyay dhammaan wixii dhibaato hore noo dhex maray.
Diyaar ma u tahay in aad toobadkeento oo aqbasho in Ciise yahay Rabbigaaga iyo badbaadiyahaaga? Isagu waa diyaar wuuna ku sugayaa. Isaga bari hadda. Oo baahidaada oo idil wuu dabooli doonaa. Wuxuuna kaa dhigi doonaa mid nolosha ku guulaysta!